# Hagaha Ansixinta Bogga Kaliyentiga (Macmiilka)

## Ee

## Ansixinta Waqti Gelinta Bixiyaha

## Nooca 1.3

# Bogga Intarnetka ee OR PTC DCI

Bogga intarnetka ee OR PTC DCI waxaa loo isticmaalaa in laga ansixiyo waqtiga Bixiyaha. Hagahan wuxuu bixinayaa tilmaamo isdaba yaala oo ku saabsan sida loo ansixiyo waqti gelinta Bixiyahaaga.

Adiga oo isticmaalaya Desktop, kumbiyuutarka laptop ama aalad casri ah sahmi:

https://orptc.dcisoftware.com/

Si aad u gasho bogga inatrnetka, geli magacaaga adeegsadaha iyo lambar sireedkaaga ay ku siisay Hay'ada. Haddii aadan aqoonin magacaaga ama lambar sireedkaaga, waxaad ka wici kartaa Miiska Caawinta DCI lambarka: 1-855-565-0155 ama la xiriir Xafiiska Deegaankaaga.



# Dashboard-ka OR PTC DCI

1. Dashboard-ka waa boggaaga koowaad.
2. Entries Requiring Sign Off (Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta) waa qeybta aad gujineyso si aad u ansixiso waqti gelinta Bixiyaha.
3. Bandhigaan wuxuu ku tusayaa dhammaan saacadaha Bixiyahaaga (bixiyeyaashaada) uu shaqeeyay uu shaqeeyay inta lagu jiray toddobaadkan. Waxaad dooran kartaa falaaraha si aad u eegto toddobaadyo kala duwan.
4. Tani waa qeybta hagaajintaada. Waxaad guji kartaa safka liiska hoos u baxa si aad u baddesho luuqada. Guji sawir calaamadeedka qofka ama magacaaga adeegsadaha si aad u baddesho lambar sireedkaaga, PIN-kaaga iyo hagaajinta kale.



# Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta

1. Guji qeybta Entries Requiring Sign Off (Waqti Gelinta u Baahan Ansixinta) si aad u muujiso dhammaan waqti gelinta Bixiyaha ee u baaahan in la ansixiyo.
2. Badhanadan waxay kuu oggolaanayaan inaad “select all” (dooratid dhammaan), “sign off” (ansixisid) ama “reject” (diidid) waqtiga Bixiyahaaga (bixiyeyaashaada).
3. Meeshan waa halka aad ka arki karto nis walbo oo Bixiyaha (bixiyeyaasha) uu shaqeeyay.



# Ansixi Dhammaan Waqti Gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha) Halmar

Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad dib u eegto oo aad ansixiso dhammaan waqti gelinta halmar. Hannaankan wuxuu kuu sahlayaa inaad doorato dhammaan waqti gelinta sugaya Sign Off (Ansixinta) oo midkood aad ansixiso ama diido dhammaan ama koox ka mid ah waqti gelinta.

1. Guji badhanka buluuga ah ee “Select All” (“Dooro Dhammaan”).
2. Guji badhanka cagaarka ah ee “Sign Off” (“Ansixi”) si aad u ansixiso dhammaan waqti gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha).
3. Dhammaan waqti gelinta ku jirta safka bidix ayaa hadda calaamadeesan.

**Ogoow** – badhanka casaanka ah ee “Reject” ("Diidid") wuxuu diidaa dhammaan waqti gelinta. Bixiyaha waxay tagi doontaa inuu dib u geliyo waqtigiisa.



# Dhameystir Ansixi Dhammaan Waqti Gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha) Halmar

1. Guji “Yes” (“Haa”) si aad u dhameystirto ansixinta dhammaan waqti gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha).
2. Dhammaan waqti gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha) hadda waa la ansixiyay.



# Ansixi Halki Waqti Gelin ee Bixiyaha Halki Marba

Waxaad ikhtiyaar u leedahay inaad dib u eegto waqti gelin kasta oo aad midiiba mar ansixiso haddii aad rabto.

1. Guji sanduuqa ku xiga waqti gelinta Bixiyaha ee aad rabto inaad ansixiso. Dib u eeg waqti gelintan.
2. Guji badhanka "S" si aad u ansixiso dhammaan waqti gelinta la oggolaaday.

**Ogoow** – guji badhanka casaanka ah ee “R” si aad u diidid waqti gelinta haddii waqti gelinta ay qaldan tahay oo uu Bixiyaha u baahan yahay inuu saxo.






# Dhameystir Ansixi Halki Waqti Gelin ee Bixiyaha Halki Marba

1. Guji "Yes" ("Haa") si aad u dhameystirto ansixinta waqti gelinta Bixiyaha (bixiyeyaasha).




**Ogoow**: Haddii aad ansixiso halki marba hal waqti gelin, waxaad lahaan kartaa waqti gelinta Bixiyaha oo badan oo aad isla qaabkaas aad ku ansixineyso.